# Taxanaha Kulamada Kormeeraha Guud ee Ka-qaybgalka Bulshada:

## Waxyaabihii aan ka Maqalnay Bulshadeenna

Seattle Public Schools

Laga soo bilaabo Febraayo ilaa Abriil 2026, in ka badan 1,000 qoys, arday, shaqaale, iyo xubnaha bulshada ayaa ka qaybgalay kulamo uu Kormeeraha Guud Ben Shuldiner ku qabtay mid kasta oo ka mid ah toddobada degmo ee agaasimayaasha guddiga, oo ay weheliso hal kulan oo dhanka internetka ah (virtual).




## Waxyaabaha ay Ka-qaybgalayaashu Sheegeen in ay Si Fiican u Socdaan

**Barayaal iyo shaqaale xoogan oo si daryeel leh u shaqaya**
Macallimiinta, la-taliyayaasha, maamulayaasha, iyo shaqaalaha dugsiga ayaa lagu tilmaamay inay yihiin kuwo heersare ah, naxariis badan, oo si weyn ugu hibeeyay naftooda guusha ardayda iyo dhisidda xiriirka.

**Bulshooyin dugsi oo wanaagsan**
Qoysasku waxay dareemeen in dugsiyadu kobciyeen dareen xooggan oo la xiriira ka-mid-ahaanshiyaha, waxayna ammaan dusha kaga tuureen deegaannada soo dhoweynta leh, kala duwanaanshaha dhaqanka, iyo ururrada waalidiinta ee firfircoon.

**Fursadaha kobcinta iyo hawlaha manhajka ka baxsan**
Muusigga, farshaxanka, jimicsiga (PE), masraxa, STEM, barnaamijyada dugsiga kadib, ciyaaraha, iyo dhacdooyinka dhaqanka ayaa loo arkay inay muhiim u yihiin taageerada horumarka "ilmaha oo dhan."

**Barnaamijyada labada luuqadood iyo luuqadaha badan**
Barnaamijyada labada luuqadood ayaa lagu tilmaamay inay yihiin wax lagu faano iyo sabab ay qoysasku u doortaan dugsiyada SPS. Qaar badan ayaa codsaday in barnaamijyadan la joogteeyo lana ballaariyo.

**Barashada isdhex-galka iyo shucuurta (SEL) iyo taageerada ardayda**
Taageerada caafimaadka maskaxda iyo dhaqammada SEL ayaa loo arkay inay yihiin kuwo aad u muhiim ah.

**Xiriirka iyo wada hadalka heerka dugsiga**
Xiriirka joogtada ah ee shakhsi ahaaneed ee ka imanaya macallimiinta iyo maamulayaasha ayaa la qaddariyay, sidoo kale waxaa la bogaadiyay iimayllada toddobadlaha ah ee Kormeeraha.

**Helitaanka baahiyaha aasaasiga ah iyo taageerada sinnaanta**
Quraacda iyo qadada lacag la'aanta ah, oo ay weheliyaan cuntada, caafimaadka, iyo iskaashiga qoyska, ayaa lagu tilmaamay inay yihiin taageero muhiim u ah ardayda iyo qoysaska.

**Fursadaha akadeemiyadeed halka ay diyaar ka yihiin**
Qoysasku waxay qiimeeyaan adeegyada kartida sare (highly capable), xisaabta horumarsan, iyo natiijooyinka hore ee wanaagsan ee ka dhashay hirgelinta Cilmiga Akhriska (Science of Reading) ee dugsiyada qaar.

## Waxyaabaha ay Ka-qaybgalayaashu Sheegeen in aysan Si Fiican u Socon

**Degganaansho la'aanta miisaaniyadda, shaqaalaha, iyo is-qorista:** Qoysasku waxay ku tilmaameen miisaaniyad-samaynta mid aan muuqan, fasallo waaweyn, yaraanta shaqaalaha, iyo isbeddellada shaqaalaha ee bisha Oktoobar inay yihiin kuwo carqalad ku ah waxbarashada iyo caddaalad-darro.

**Xiriirka, hufnaanta, iyo kalsoonid:** Qoysas badan ayaa la wadaagay niyad-jab ku saabsan farriimaha aan is-waafaqsanayn, isbeddellada soo noqnoqda, iyo hababka go'aan qaadashada ee degmada oo aan caddayn.

**Waxbarashada horumarsan iyo adkeynta akadeemiyadeed:** Qoysasku waxay sare u qaadeen walaacyo ku saabsan adeegyada aan joogtada ahayn, kala duwanaanshaha xaddidan ee waxbaridda, iyo hoos u dhac laga dareemayo loolanka akadeemiyadeed.

**Adeegyada iyo taageerooyinka gaarka ah:** Special Education and 504 services were described as inconsistent and difficult to navigate, with staffing gaps and unclear accountability.

**Isticmaalka xad-dhaafka ah ee tignoolajiyada:** Wakhtiga badan ee lagu bixiyo shaashadaha, gaar ahaan fasallada yaryar, iyo xeerarka aan caddayn ee ku saabsan talefannada gacanta iyo AI (caqliga macmalka ah) ayaa ahaa walaacyo caadi ah.

**Badbaadada iyo jawiga dugsiga:** Qoysasku waxay soo xigteen asluub-marinta aan joogtada ahayn, dabeecadaha ardayda ee sii xumaanaya, iyo walaacyada ku saabsan badbaadada jirka.

**Sinnaanta iyo farqiga udhexeeya ilaha kheyraadka:** Sinnaanta waxaa lugu tilmaama iney tahay qiimo joogto ah balse aan had iyo jeer laga dhabayn dhamaan dugsiyada.

**Caqabadaha hortaagan tabaruca iyo ka-qaybgalka qoyska:** Hababka tabaruca ayaa lagu tilmaamay inay yihiin kuwo gaabis ah oo wareer leh, qoysaskuna waxay inta badan dareemeen in ka-qaybgalkoodu yimaado ka dib markii go'aannada hore loo gaaray.

## Fikradaha ay Ka-qaybgalayaashu Nala Wadaageen si loo Horumariyo:

- **Kordhinta hufnaanta miisaaniyadda iyo qoondaynta kheyraadka si caddaalad ah**
- **Xasilinta shaqaalaha iyo hubinta adeegyada aasaasiga ah ee dugsi kasta**
- **Hagaajinta xiriirka iyo ka-qaybgalinta qoysaska go'aannada waqti hore**
- **Xoojinta adkeynta akadeemiyadeed, kala duwanaanshaha ku salaysan xirfadda, iyo fursadaha barashada horumarsan**
- **Joogteynta iyo ballaarinta barnaamijyada labada luuqadood**
- **Yareynta isticmaalka xad-dhaafka ah ee tignoolajiyada iyo caddaynta waxyaabaha laga filayo**
- **Sahalinta hababka tabaruca iyo ka-qaybgalka qoyska**
- **Hubinta qorshayn hufan oo cad oo ku saabsan dhismaha iyo isku-darka dugsiyada**

## Maxaa Xiga:

Kormeeraha Shuldiner wuxuu isticmaali doonaa ra'yigan si uu u hagayo ficillada muddada gaaban iyo muddada dheer ee hoggaaminta degmada. Wuxuu qorsheynayaa inuu sii wado fadhiyada ka-qaybgalka bulshada ee bil kasta, oo ay ku jiraan sheekaysiga diiradda lagu saarayo mowduucyo gaar ah iyo heerarka dugsiyada ee kala duwan (dugsiga hoose, dhexe, iyo sare). Ra'yiga ku saabsan kulammada laftooda ayaa loo isticmaali doonaa in lagu horumariyo qaabka iyo doodaha waqti ka dib. Waad ku mahadsan tahay taageeradaada joogtada ah ee Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle.

## Nuxurka Kulamada:

Booqo degelka internetka si aad wax badan uga ogaato adiga oo raacaya URL-ka ama kamaradda saaraya QR Code-ka: https://www.seattleschools.org/what-we-heard/